

Si aad u hesho macluumaadkan oo qaab muuqaal ah, sawir koodka QR ama booqo

[www.youtube.com/watch?v=Aq-RU3JRc-0](http://www.youtube.com/watch?v=Aq-RU3JRc-0)



## Mitirrada Casriga ah

Nolasha ka dhig mid caqli ku shaqeeysa...

Mitirrada caqliga ku shaqeeyaa waa mitirro casri ah oo gaaska iyo korontada ah oo loogu talagalay inay ku siiyaan xog badan oo ku saabsan isticmaalkaaga tamarta isla markaana fududeeyaan bixinta kharashaadka.

Mitirrada caqliga waxaa rakibaya shirkadaha tamarta ee UK. Waxay ka kooban yihiin laba qaybood:

- Mitirka laftiisa oo beddelaya mitirkaaga hadda jira, Marwaba qoro inta gaas ama koronto aad isticmaasho iyo goorta aad isticmaasho kuna diro xogtan shirkadda tamarta.
- Qalabka guriga lagu dhigi doonaa oo ku siinaya xog ku dhowaad waqtiga dhabta ah oo ku saabsan isticmaalkaaga tamarta.

### Faa'iidooyinka maaliyadeed ee Mitirradda casriga ah

Mitirrada caqliga ku shaqeeyaa waxay bixiyaan faa'iidooyin maaliyadeed, ha ahaato dadka isticmaala biilasha bilaha ah "credit meters" ama kuwa lagu shubto "prepayment meters".

#### Mitirrada biilasha la bixiyo bishii iyo wixii ka badan:

Mitirrada casriga ahi waxay si toos ah ugu diraan xogta shirkadda tamarta, markaa looma baahna booqasho qof imanaya si uu akhriska u qaado, mana lagaa rabo inaad adigu akhrido oo u dirtid. Looma dirayo biilal ku saleysan qiyaas. Tani waxay ka dhigan tahay inaad had iyo jeer bixiso lacag sax ah oo ku salaysan inta gaas ama koronto aad isticmaashay.

**Mitirradda lagu shubto:** Waxaad ku buuxsan kartaa si fudud adoo meeshaad doonto jooga, telefoon, fariin, app ama internet. Looma baahna inaad aado goob lacag-bixin. Tani waxay ka hortagaysaa inaad kaa go'do gaas ama koronto haddii kaydku dhammaado xilli goobaha kuu dhaw xidhan yahiin ama haddii aad



Sawirka kore: qalabka muujinta guriga.

lumiso kaarka ama furaha buuxinta. Shirkado qaar waxay bixiyaan ikhtiyaar ah in si toos ah loogu buuxiyo marka kaydku hoos uga dhaco xad cayiman, ama waxaa jiraa badhan deyn degdeg ah ku siinaya oo ka muuqda qalabka guriga lagu muujiyo.

Mitirrada casriga ahi waxay ka shaqayn karaan labadaba "prepay iyo credit" ka biilaasha iyo ku shubashadabba. Tani waxay fududaynaysaa inaad u beddesho habka lacag bixinta bil kasta ama saddexdii biloodba mar, ama dib ugu noqoto.

Mitirrada casriga ah waxay sidoo kale ka caawinayaan nidaamka tamarta in si fiican loo ogaado inta koronto loo baahan yahay, goorta iyo halka loo baahan yahay. Tani waxay gacan ka geysataa ilaalinta tamarta, hufnaanta isticmaalka, iyo ka faa'iidaydiga tamarta la cusboonaysiin karo.

### Qiimaha kala duwaneed wakhtiga isticmaalka tamarta

Haddii aad leedahay mitir casri ah, waxaad ka faa'iidaydigan kartaa qiimayaal cusub oo la yiraahdo "dynamic time-of-use tariffs". Kuwani waxay ku siinayaan qiimo jaban wakhtiyo gaar ah sida habeenkii ama marka tamarta dabaysha iyo qoraxdu badan tahay. Tani waxay kaa caawin kartaa inaad lacag beekhaamiso iyo in la yareeyo wisikhaynta hawada.

Mitirrada caqliga ku shaqeeyaa waxay diri karaan akhriin 30 daqiiqo kasta waxaana jiri kara qiime kala duwan nus-saac kasta. Waxaad ka faa'iidaydigan kartaa qiimayaashan adigoo adeegsanaya qalabka casriga ee caqliyeesan ah sida mashiinka dharka oo bilaaba shaqada habeenkii marka korontadu jaban tahay.

### Qalabka muujinta tamarta guriga lagu isticmaalo

Dhammaan mitirrada caqliga waxay leeyihiin qalab muujin yar oo shaashad leh oo aad dhigato meel guriga ka mid ah. Waxay ku tusaysaa isticmaalkaaga



tamarta waqtiga dhabta ah iyo kharashka. Waxay ku tusaysaa inta koronto aad hadda isticmaalaysa ama inta lacag ah ee aad ku qarash gareynayso. Waxaad arki kartaa isticmaalkaaga maalintii, usbuucii, bisha ama sanadka.

Tani waxay kuu oggolaanaysaa inaad indho ku hayso gaaska iyo korontada aad isticmaasho iyo kharashka. Waxay kaa caawinaysaa inaad ogaato qalabka isticmaalka badan iyo inaad yarayso kharashka biilasha.

Haddii uu yahay prepayment, qalabka muujinta guriga wuxuu ku tusayaa inta lacag kuu hadhay, deynta iyo wuxuu kuu oggolaanayaa inaad dejiso yoolal iyo miisaaniyad.

Waxaa jira laba jiil oo mitirro ah: SMETS1 iyo SMETS2. Shirkadaha intooda badan waxay hadda rakibayaan SMETS2. SMETS1 markii hore dhibaato ayaa ka jirtay marka shirkad la beddelo, laakiin waxaa lagu xallinayaa cusboonaysiin fog. Haddii mitirkaagu aanu cusboonaysiin karin, shirkaddaadu waa inay ku siiso SMETS2 cusub.

Qaar ka mid ah shirkadaha weli ma bixiyaan mitirrada prepayment casriga ah ee caqliga ku shaqeeya ah, laakiin dhammaan shirkaduhu waxay bixin doonaan dhawaan.

Haddii aadan rabin mitir casri ah, laguma khasbaayo. Laakiin qaar ka mid ah qiimayaasha cusub ayaa khasab ka dhigaya in mitir casri ah lagu rakibo.

## Rakibidda mitirrada casriga ah

Smart Rakibiddu waa mid fudud, badanaa wax ka yar saacad. Koronto ama gaas ayaa si ku-meel-gaar ah loo daminayaa. Shirkadda tamarta ayaa kula heshiinaysa waqti injineer yimaado. Waxaad codsan kartaa in injineerku ku soo waco 30 daqiiqo ka hor. Waxa kale oo aad codsan kartaa eray sir ah oo uu injineerku sheego marka uu yimaado.

Injineerka ayaa sharxi doona sida mitirka iyo qalabka muujinta u shaqeeyaan. Haddii uu yahay mitir gaas, wuxuu sameyn doonaa hubinta badbaadada qalabka gaaska.

## Codsashada mitir caqli ah

Wax lacag ah lagaama qaadayo. La xiriir shirkaddaada tamarta oo weydiiso mitir caqli ah, ama isticmaal internetka oo boggan kala xidhiidh [:www.smartenergygb.org/en/get-a-smart-meter](http://www.smartenergygb.org/en/get-a-smart-meter)

## Sheekooyinka khaldan ee laga faafiyey Mitirrada casriga ah

### “Ma aha guryo dhan oo mitirrada lagu rakibi karo”

Installation 99% guryaha waa suuragal. Mitirrada cusub looma baahna shabakadda mobilada.

### “Ma beddeli kartid shirkadda”

Mitirrada jiilka cusub waxay kuu oggolaanayaan inaad si caadi ah shirkad u beddesho.

### “Mitirradu way ku basaasi karaan”

Mitirradu waxay qoraan kaliya isticmaalka guud nus saac kasta, waxayna xogtan si ammaan ah ugu diraan shirkadda. Ma kaydiyaan macluumaad shaqsiyeed.

### “Economy 7 iyo 10 lama taageero”

Mitirrada SMETS2 iyo qaar SMETS1 waa ay taageeraan.

### “Kiraystayaashu ma heli karaan”

Haddii adiga aad bixiso biilasha, waad codsan kartaa mitir casri ah.

### “Mitirradu waa khatar”

Hay’adda caafimaadka ee UK waxay sheegtay inaysan jirin wax halis caafimaad ah.

Waxaa jira qalab muujin ah oo gaar ah oo loogu talagalay dadka aragga daciifka ah ama indho la’aanta ah, oo leh badhamo la taaban karo, shaashad midab xooggan iyo cod akhris. Waxaa loo bixiyaa bilaash haddii aad codsato.



St James Court  
St James Parade  
Bristol BS1 3LH

0117 934 1400  
cse.org.uk  
info@cse.org.uk

## Contact us:

PHONE 0800 082 2234

EMAIL [home.energy@cse.org.uk](mailto:home.energy@cse.org.uk)

We’re a charity (298740) supporting people and organisations across the UK to tackle the climate emergency and end the suffering caused by cold homes.

Our Home Energy Team offers free advice on domestic energy use to people in central southern and southwest England.

See all our energy advice pages at [www.cse.org.uk/advice](http://www.cse.org.uk/advice)